



## XAFIISKA GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA

--Muqdisho, January 20, 2018--

Tan iyo intii uu soo xirmay kalfadhigii 2aad ee Golaha Shacabka, waxaa Xafiiska Guddoonka Golaha Shacabka soo gaarayey aragtiyo kala duwan oo ku aaddan ka go'aan gaarista maqaamka Caasimadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, aragtiyadaas dadweyne oo xambaarsan walaac saameyn ku yeelan karta midnimada qaranka, faritaanada Dastuurka lagu heshiiyey iyo xasiloona siyaasadeed ee dalka.

Annagoo ogsoon inuu Golaha Shacabku ku jiro fasaxiisii Dastuuriga ahaa ayaa kulan uu Guddoonka Golaha Shacabku ka yeeshay mawduucaan xasaasiga ah ayaan ku guddoonsanay qoddobada soo socda;

1. In ay laga maarmaan tahay si wada jir ah looga hortago wax walba oo keeni kara xasiloona daro siyaasadeed iyo khilaafaad dastuuri ah oo dib dhac kale ku keena habsami u socodka hawlaha culus ee horyaala golayaasha iyo xafiisyada dastuuriga ah ee dalka;
2. In ka go'aan gaarista maqaamka caasimada loo raaco sida uu dhigayo qodobka 9aad ee Dastuurka oo na faraya ***“maqaamka magaalo-madaxda Federaalka Soomaaliya waxaa go'aan looga gaari doonaa dib-u-eegidda Dastuurka, waxaana sharci gaar ka soo saari doona laba aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya”***;
3. In Golaha Shacabku leeyahay awoodda matalaada shacabka Soomaaliyeed sida uu qabo Qodobka 63aad ee Dastuurka, loona baahanyahay in lagu xurmeeyo gudashada waajibbaadkiisa oo ay mid tahay ka go'aan gaarista maqaamka magaalo-madaxda dalka sida uu qabo qodobka Dastuurka ee sare ku qoran;
4. Inta laga gaarayo dhamaystirka dib-u-eegista dastuurka go'aana laga gaarayo maqaamka Magaalo-madaxda sharci gaar ahna uu Baarlamaanku ka soo saarayo, ma jirto cid kale oo awood sharci u leh ka go'aan gaarista maqaamka Caasimadda;
5. Waxaan ugu baaqeynaa dhamaan qeybaha bulshada Soomaaliyeed in loo midoobo amniga iyo dhameystirka hannaanka federaaleynta dalka oo ay saldhig u tahay dib-u-eegista Dastuurka dalka;

Guddoonka Golaha Shacabka



Tell: +252 612224442/ +252 615577472

E-mail: [speaker@parliament.gov.so](mailto:speaker@parliament.gov.so)

Website: [www.parliament.gov.so](http://www.parliament.gov.so)